

# Waxaad Xaq U Leedahay Inaad Hesho “Qiyaas Niyad Wanaag ah”

## Sharaxaysa inta ay ku kacayso daryeelka caafimaadkaaga

Sida uu qabo sharciga, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka waxaa laga rabaa inay bukaannada siiyaan qiyaas niyad wanaag ah marka ay codsadaan. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato qiimaha adeegyada caafimaadka ee aan weli la bixin.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Qiyaas Niyad Wanaag ah oo ku saabsan wadarta guud ee kharashka la filayo ee shay ama adeeg kasta oo aan degdeg ahayn. Tan waxaa ku jira kharashyada la xiriira sida baaritaannada caafimaadka, daawooyinka dhakhtarku qoro, qalabka, iyo kharashyada isbitaalka.

Hubi in bixiyahaaga daryeelka caafimaadku uu ku siiyo Qiyaas Niyad Wanaag ah oo qoraal ah ugu yaraan 1 maalin oo shaqo ka hor adeeggaaga caafimaad ama shaygaaga. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka, iyo bixiye kasta oo kale oo aad doorato, Qiyaas Niyad Wanaag ah ka hor inta aadan jadwalayn shay ama adeeg.

Haddii aad tahay bukaan jeebkiisa ka bixinaya ama aan caymis lahayn oo aad hesho biil ugu yaraan \$400 ka badan Qiyaastaada Niyad Wanaagga ah, waxaad ka doodi kartaa biilka sida waafaqsan sharciga federaalka.

**Hubi inaad kaydiso nuqul ama sawir ah Qiyaastaada Niyad Wanaagga ah.**

Wixii su'aalo ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada federaalka ee Qiyaas Niyad Wanaag ah, booqo [www.cms.gov/nosurprises](http://www.cms.gov/nosurprises) ama wac **866-804-2499**.